Tilmaamaha Adeega Ciidanka Booliska Toronto

Iska warrama soo nabad ma'ahan, waxaan ahay Guddoomiyaha Ciidanka Booliska magacayguna waa William Blair.

Hadaanu nahay Ciidanka Booliska Toronto waanu ognahay in aanu u shaqayno magaalada ugu kala dhaqanka duwan adduunka, halkana ciidankaga booliska shaqadoodu waxay tahay in ay idin caawiyaan mar walba iyaga oo aan idiin eegaynin halka aad ka soo jeedaan ama afka aad ku hadashaan.

Adinkoo iska raacanaya nolol maalmeedkiina waxaad arki ciidanka Booliska oo gaafwareegaya wadooyinka xaafadahiina.

Waa ay lugeeynayaan, wadanayaan gawaari iyo bishkileeti, dhamaantoodna waxay halkaas u joogaan in ay ku caawiyaan.

Waxaan kugu dhiirigelinayaa in aad la hadashid askartaas – una sheegtid arrimaha naftaada la xiriira, bulshadaada iyo wixii amaanka la xidhiidha ee aad doonaysid in aad kala hadashid.

Cajaladan maqalka iyo muuqaalka ah waxaa loogu talagalay in ay kaa caawiso in aad fahamtid waxyaabo badan oo la xidhiidha ciidanka Booliska iyo waxa aad ka filan kartid marka aad la kulantid askarta ciidanka Booliska.

Waxa ay kuu sheegaysaa sida aad ula xidhiidhi kartid askarta haddii aad u baahan tahay caawimaad, waxayna kuu sharaxaysaa qaar ka mid ah xuquuqdaada iyo mas'uuliyadahaaga marka aad la kulmaysid ciidanka Booliska.

Ciidanka Booliska Toronto waxay si sharfan uga tarjuntaa bulshada kala gedisan ee ay u adeegto. Waxa aanu u heelanahay in aanu fulino adeega amaanka annagoo kaashanayna bulshooyinkeenna sidii aan Toronto uga dhigi lahayn meesha ugu wacan, uguna nabada badan.

Cajaladan maqalka iyo muuqaalka ah waxay kuu soo bandhigi doontaa warbixino ku saabsan ciidanka Booliska kuwaasoo ay bixiyaan Ciidanka Booliska Toronto…
Iyo Sidii aad ugu heli lahayd taageero kaaga timaada Ciidanka Booliska marka aad u baahan tahay.

Waxay ku siin doontaa warbixino ku saabsan xuquuqdaada iyo mas'uuliyadahaaga ka mid ahaansho bulshadaada…
Iyo tan Ciidanka Booliska.

Waxay kaloo ay kuu soo bandhigaysaa warbixino khusaysa sabaha Ciidanka Booliska ay dadka u istaajin karaan…
Iyo waxa aad ka fili kartid haddii ay ku istaajiyaan ciidamada Booliska.

La xiriirid Ciidanka Booliska:

Teleefon lambarka gargaarka degdega ee Ciidanka Booliska Toronto waa 9-1-1
Teleefonka aan ahayn gargaarka degdega ah waa 416-808-2222

9-1-1 waxaa keliya oo loo isticmaali karaa waa gargaarka degdega ah oo keliya, oo ay ka mid yihiin dab damiska, marka dambi uu dhacayo, daryeelka caafimaadka degdega ah ama marka gaadiid isku dhacaan.

416-808-2222 waxaa loo isticmaalaa marka aysan jirin gargaar degdeg ah sida tuugada, marka baasaboor uu lumo iyo marka la is khiyaamo.

9-11 waa gargaarka degdega ah afkasta. Marka aad wacdo 9-1-1 qofka kaaqabta waxa uu odhanayaa "gargaarka degdega ah, ma waxaad u baahan tahay ciidanka Booliska dab damiska ama daryeelka caafimaadka?"

Haddii uusan Ingiriis afkaagu ahayn

9-1-1 qofka kaaqabta waxa uu ku waydiinayaa in aad sheegtid afka aad doonaysid in aad ku hadashid. Haddii aad hadli waysid si kastaba ha ahaatee ama afka aad ku hadashay la garan kari waayo, qofka kaaqabta waxa uu abuurayaa wacid loo sameeyo ciwaanka aad ka soo wacday oo lambarkaasi uu leeyahay.

Haddii aad ka soo wacaysid teleefonka gacanta waa in aad u diyaar garoowdaa in aad sheegtid halka looga baahan yahay caawimaada.
Haddii qofka kaaqabtay uu ogaado afka aad ku hadlaysid waxaa lagugu xidhayaa adeega afkaas.

Tarjume ku hadla afkaaga ayaa u sharaxa 9-1-1 qofka kaaqabtay waxa uu yahay gargaarkaaga degdega ah, markaasna waa laguu soo dirayaa caawimaada aad u baahan tahay.

Maxaan sameeyaa marka Ciidanka Booliska ay yimaadaa aqalkayga?

Aqalka aadamuhu uu ku nool yahay waa mid barakaysan. Dhab ahaantiina maxkamaduhu waa ay aqoonsan yihiin karaamada uu leeyahay aqalka qofi uu degan yahay. Ciidamada Booliska aqalkaaga waa soo gali karaan haddii lagu marti qaado, marka ay jirto gargaar degdeg ah sida marka laga jawaabo teleefonka 9-1-1…
…Marka warqad sharciyeed laguu soo bandhigo sida warqad aqal ku gelid.

Haddii Ciidamada booliska ay albaabka yimaadaan, ka jawaab albaabka adigoo aqoonsanaya ciidamada booliska. Mudnaantoodu waa in ay hubiyaan amniga dadka.

Inta badan askarigu ma fahmi karo ama ma garan karo kala duwanaashaha dhaqankaaga.

Waa mid aad iyo aad muhiim u ah in askariga aad kala xaajootid baahidaada, tusaale ahaan wargeli askariga haddii aad leedahay meel aad salaada ugu talagashay, ha ka baqin in aad waydiiso su'aalo ama aad u sharaxdo waxyaabo gaar ah oo uusan askarigaasi fahmi Karin. Xusuusnoow askarigu halkaas waxa uu u joogaa in uu adiga ku caawiyo.

Waa Maxay hadii qofi uusan ku hadlin ama uusan fahmaynin afka ingiriiska?

Magaalada Toronto waa magaalada ugu badan dadka kala dhaqanka ah adduunka. Inta badan dadkeedu afka Ingiriisku waa afkooda labaad.

Haddii aadan ku hadlin af Ingiriis waa in aad isku daydaa in ay kula joogaan qof ka mid ah qoyska ama saaxiib in uu kaa caawiyo arrimaha la xidhiidha sharciga. Haddii aysan tani suurta gal ahayn Ciidanka Booliska Toronto waxay haystaa liis ku qoran ciidanka booliska ee ku hadla afaf kala gedisan kuwaasoo ku caawini kara.

Waligaa ha aqbalin ama ha saxeexin wax ku saabsan arrimo la xidhiidha sharciga ilaa iyo intii aad ka fahmayso waxa aad aqbalaysid.

Maxaan sameeyaa marka uu askari uu isoo aado anigoo maraya waddada?

Askarigu waa uu kugu istaajin karaan saddex arrimood oo guud ahaaneed:

Haddii uu askarigu uu kugu tuhmo in aan gashay dambi

Haddii askarigu uu ku arko adigoo galaya dambi

Haddii aad gaari wadid.

Ciidamada booliska waxay ku dhaarteen in ay ka hortagaan, baadhaan dambiyada, dhawraana nabadda. Sidaa daraadeed, askarigu waa uu kula hadli karaa, oo uu kaala hadli karaa arrimo faro badan oo aadan war iyo wacaal toona aadan u hayn.

Shaqooyinkani waxaa ka mid ah:

Waraysi ay la yeeshaan markhaatiyaal goobjoog u ahaa dambiyo iyo waraysiyo shaqsiyaad loo maleeyay, u ekaaday in ay yihiin dad la tuhmayo in ay dambi galeen.

Ma in aan ka jawaabo miyaa su'aalaha askarigu uu i waydiiyo ama aan iscadeeyo?

Guud ahaan xil kaama saarna in aad isu cadaysid askariga qofka aad tahay. Laakiin, waxaa jira ka-reebis
waxaana ka mid ah:

Haddii aad wadid gaadhi,

Haddii aad dambi gashay kaasoo ah dambi gobolleed sida…

Khamriga, u-dhicid dhul-dadow ama aad gashid dambi la xiriira kaxeynta gaadhi.

Arrimahan oo kale marka ay dhacaan la shaqee askariga, ugana jawaab su'aalishiisa sida ugu wanaagsan ee ah karaankaaga.

Haddii ciidanka booliska ay kugu tuhmaan in aad gashay dambi ama aad u muuqatid in lagaa shakin karo ciidanka booliska waxay doonayaan in ay ogaadaan qofka aad tahay.

Waxaa jira dhawr asbaabood oo kugu kallifaya in aad ciidanka booliska u sheegtid qofka aad tahay:

Haddii ciidanka booliska ay baadigoobayaa qof kale waa in aad ka foojignaataa in aan lagu xidhin adigoo bidhaaminaya in aadan ahayn qofkaas.

Haddii ciidanka booliska u malaynayaan in aad dambi gashay oo aadan u sheegin qofka aad tahay waxaa dhici karta in ay ku xidhaan, oo ay kugu hayaan xarunta saldhig ciidanka booliska ilaa iyo inta ay ka ogaanayaan cidda aad tahay.

Haddii ciidanka booliska ku fikiraan in aad samaysay dambi sahlan oo aad isu cadaysay sida ay doonayaan waxay ku siin kataan tigidh ama wargelin kuu sheegaysa wakhtiga aad imaanaysid maxkamada intii ay ku xidhi lahaayeen.

Sharci gaadiideed

Haddii lagugu wargeliyay in aad joogsato oo uu kugu wargeliyo askari, tartiib u soco adigoo waddada geesteeda shishe ee midigtaada ah istaagaaya.

Ku jir gudaha gaadhigaaga ilaa iyo intii uu askariga kugu wargeliyo si kale.
U diyaar garoow in aad soo bandhigto cadeemahan soo socda adigoo tusaya askariga:

Warqada lagu wado gaadiidka batante sharciyeeysan

Warqada gaadhiga u sharciyeeysan iyo taarigada baabuurka saxanka

Iyo cadeyn la xidhiidha caymiskaaga.
Haddii lagu siiyo tigidh u aqbal si degan. Aqbalidaada tigidhka ma'ahan in aad tahay dambiile.

Waa maxay xuquuqdaydu haddii la i xidho?

Dastuurka Xuquuqda Kanadiyaanka iyo xoriyadda ayaa ku badbaadinaya haddii lagu xidho ama ciidanka Booliska ay ku xidhaan. Xuquuqdaan waxaa ka mid ah:

Waxaad xaq u leedahay in markiiba lagugu wargeliyo sababta laguu xidhay ama laguu hayay;
Waxaad xaq u leedahay in aad qabsatid qareen oo aan dib loo dhigin iyo in lagugu wargelliyo xuquuqdaas aad leedahay. Tan waxaa ku lammaan in lagugu wargeliyo suurtagelnimada qareen bilaash ah iyo sidii aad ku heli lahayd. Erayada "in aan dib loo dhigin" waxaa loo fasiray in ay la micna tahay marka arrimuhu caadi yihiin oo la sugo amniga qof kasta.

Haddii aad ka yar tahay 18 jir waxa aad leedahay xuquuqo kale sida xuquuqda aad u leedahay in aad la hadli kartid waalidkaa ama ruux kale oo ku habboon oo qaan gaar ah sida ugu dhakhsaha badan.

Ciidanka booliska waa in ay kuu sheegaan oo ay kuu sharaxaan xuquuqdan.

Ka warran haddii aan ka cabanayo ciidanka Booliska?

Waad ka caban kartaa qorshe hawleedka ama adeega ay fidiyaan Ciidanka Booliska Toronto ama sida uu kuula dhaqmay askarigu.

Waxaa keliya oo cabashada soo gudbin kara qofka sida tooska ay u khusayso.

Cabashada waa in ay ahaataa mid qoraal ah waana in qofkaasi uu saxeexo samaynaya cabashada. Cabashada waxa ay noqon kartaa mid warqadeed ama qoraal diyaar ku ah xarumaha ciidanka booliska ama Xafiiska madaxa banana ee gudiga qiimeynta wax qabadka Boliiska.

OIPRD
655 Bay Street, 10th Floor
Toronto, Ontario
M5G 2K4

Telefoonka Guud: 1-877-411-4773
Telefoonka Gudaha: 416-246-7071

www.oiprd.on.ca

Warqado qeexaya habka loo sameeyo cabashada waxa ay diyaar ku yihiin xarumaha ciidanka booliska ama mareegtada Ciidanka BooliskaToronto
www.torontopolice.on.ca

cabashadana guud ahaan waa in la sameeyaa 6 bilood gudahood

Sidee baan u noqdaa askari?

Ciidanka Booliska Toronto waxa ay si joogta ah u baadigoobaysaa dadka ka mid ah dadyoowga kala gedisan ee ku nool magaaladeenna kuwaasoo doonaya in ay ka mid noqdaan askarta.
In aad ka mid noqoto ciidanka booliska waa in aad buuxisaa qawaaniinta lagu qeexay sharciyadda ciidanka booliska. Waad in aad:

Ahaataa qof Kanadiyaan ah ama haysta warqada degenaashaha Kanada;

Ahaataa ugu yaraan 18 jir;

Waa in aad dhamaysatay ugu yaraan 4 sano oo dugsi sarre ah ama u dhiganta;

Waa in aad ahaataa qof dabeecad wanaagsan oo leh anshax suubban;

Aan lahayn wax dambi ah oo aan laga cafin;

Maskaxiyan iyo caafimaad ahaanba qaban kara shuqulada la xidhiidha shaqada.

Waa in aad tahay:

Waa in ay yihiin indhahaagu 20/40 caadi midabka aragtidaada;

Leedahay warqada lagu wado gaadhiga batante ‘nooca G’ oo aadan haysan dhibcaha hoos u dhicida dhibcaha dambigalka wadista oo aysan ka hoosayn 6 dhibcood;

Waa in aad haysataa gargaarka koowaad iyo gurmadka degdeg ah qaybta C.
Wixii warbixin dheeraad ah kala xidhiidh uqaybsanaha qorista shaqada oo ka tiigso 416-808-JOIN.

Waxaan rajaynayaa warbixinta ay xambaarsan tahay cajaladan maqalka iyo muuqaalka ah in ay kaa caawisay in aad fahamto wax badan oo khuseeya Ciidanka Booliska Toronto.

Fadlan kaydso nuqul ka mid ah qoraalka “Tilmaamaha Adeega Ciidanka Booliska Toronto” si uu kuu xusuusiyo sida loola xiriiro ciidanka booliska marka uu ku haleelo gargaarka degdega ah, sida loola xidhiidho ciidanka booliska marka aysan ahayn gargaar degdega ah ama waxa la sameeyo marka ciidanka booliska ay ku istaajiyaan.

Fadlan xusuuso ciidanka booliska waxa ay halkan u joogaan in ay ku caawiyaan af kasta oo aad ku hadasho. Marka ay kugu dhacaan gargaar degdeg ah waxa aad ka heli kartaa taageero adiga oo soo wacaya 9-1-1.